

---

## Talooyin loogu talagalay Kulanka Waalidka-Macallinka oo Guulaysta

Kulamada waalidka-macallinku waa waqtiga waalidiinta/ mas'uuliyiinta iyo macallimiintu ay wadaagaan macluumaadka, ka wada hadlaan horumarka ardayga isla markaana abuuraan xiriiro ardayda ka caawin doona in ay guuleystaan.

Waxaad wax badan ka ogtahay ardaygaaga marka la eego qofkasta oo dugsiiga jooga. Macallinka ardaygaaga (ama macallimiintu) waxay doonayaan in ay war kaa maqlaan. Adiguna waxaa doonaysaa in aad war ka maqasho macallinka (macallimiinta).



